

Qaadashada guriga lagu siiyey

Codsada walba waxaan guri siinaa hal mar Codsahada waxa uu haystaa dhowr maalmood uu ku qabsado ballanta ah in uu guriga soo arko, kurigana uu ku qaato Haddaad guriga lagu siiyey aadan kusoo jawaabin waqtiga lagu qabtay, waxa lasiinayaa guriga qofka kale ee soo codsaday. Waxaa wanaagsan markasta guri lagusiiyo in aad ka jawaabtid, xitaa haddii aadan guriga ka helin. Markaas guriga waxaan oogu siineynaa codsade kale haddii qofkaas kale gurigu uu yahay guriga uu doonayo.

Codsaha haddii uu guriga qaato inta aadan guriga saxiixin waxaa laga rabaa in aad keento caddeemahan si aad guriga u saxiixtid:

- Codsade kasta oo ka weyn 18 jir waa in uu keenaa caddeenta warqadda canshuurta iyo go`aanka canshuurta oo tavatiran
- Codsade kasta oo ka weyn 18 jir warqadda uu mushaarka ku qaato ama dhaqaalaha kale ee soo galo ee uu canshuurta ka bixiyo ama caddeynta adraynimada
- Caddeyn ah hantidaada qiimaheeda

Lifaaqyada haddii loo baahdo:

- Caddeynta in aad uur leedahay
- Caddeyn ah in aadan guri heysan, meesha aad seexato, sababta keentay in aadan guri heysan, haddii guriga lagaa saaray caddaynta warqaddii la gaaga saarey ama go`aanka lagaaga saaray
- Go`aanka furriinka ama caddeyn ah in furriin kuu maqan yahay
- Caddeyn ah mas`uuliyadda carruurta iyo in ay kula deggan yihiin (carruurta kayar 15 jir)
- Go`aanka masruufka aad bixiso
- Caddeyn ah codsadhaha iyo dadka la deggan dhammaan deemaha lagu leeyahay.
- Codsadhaha lifaaqyada kale ee uu u arko in loo baahan yahay

Deebaajiga

Lacagta deebaajiga waxaa la bixinayaa inta aan la saxiixin heshiiska. Lacagta deebaajiga waxaa loogu talagalay in lagu dayactiska guriga iyo ijaarka lagu xalliyo. Lacagta deebaajiga waa 1 - 3 bilood lacagta ijaarka. Deebaajigu waxa uu noqon karaa lacag ahaan, warqadda ay Keladu kugu damiinayeyso, ama labo qofood deemahood damiinkooda.

Lacagta deebaajiga waxaa lagu soo celinayaa bil kadib marka uu heshiisku dammaado, oo gurigana baaritaan lagu sameeye. Marka aad guriga ka guureysid waxaa muhiim ah in aad guriga si wanaagsan u nadiifisaa, guriga uu wanaagsan yahay waana in aad celisaa dhammaan furayaasha oo dhan. Lacagta deebaajiga waxaan u isticmali karnaa haddii ijaar ama kiro lagugu leeyahay, haddaan nadiifino ama haddii meel aad jabisay aan dayactirno.

Heshiiska guriga

Qaybteena u adeegidda macmiilka ballan ayaad ka qabsan kartaa si aad u saxiixdo heshiiska guriga, ama xafiiskeena xilliga uu furanyahay ayaad imaan kartaa. Heshiiska guriga waxaa saxiixaya dhammaan qaybaha wax ku heshiinaya oo dhan. Haddi qof saxiix looga baahnaa uusan goobta iman karin waa in qofka uu wakiishay heystaa warqadda caddeynta wakiilashada. Kutalagal in aad heysatid aqiinsigaaga.

Heshiiska waxaa asal u ah in lacagtii deebaajiga labixiyey, dhammaan warqadihii lagusoo weydiiyey oo dhan in aad u keentay dadka guriga kaa ijaaraay, in aad guriga gelisay caymis ah guriga iyo dhibaataada aad geysatid.